

Af Soomaaligu ma af Carabiguu la bah yahay, ama ka soo jeedaa? Haddii ay warcelintu maya tahay, maxay ku kala duwan yihiin?

Cabdiraxmaan Guri Barwaaqo  
Herer\_09@yahoo.com

*Somali is an Afro-Asiatic language, of the [Cushitic](#) branch. It is most related to the [Afar language](#) and [Oromo language](#). It is distantly related to the [Arabic language](#) and other [Semitic languages](#). Somali has been very influenced by Arabic, as a large number of words have been borrowed from Arabic. (Source: [the chemistry of encyclopedia](#))*

I. Hordhac:

Waagii uu socday loollankii loogu jirey xuruufta lagu qorayo af Soomaaliga, wadaaddadu waxay ku doodijireen in erayga 'Latin' uu la ujeeddo yahay 'Laa Diin' si ay dadka u soof daran habaabiyaan, ama ugu beer laxawsadaan, oo loo qaato higgada carabida. Taasi danbaabay ahayde, waxa hadda socda olole dadka lagaga dhaadhicinayo inuu af Soomaaligu yahay af Carabi isbeddeley loona baahan yahay kol haddii aan Carab nahay inaan afkii awoowyadeen ku noqonno.



Runtii waa aragti halisteeda leh oo haddii aan hadda wax laga qaban lagana hortegin ololahaasi uu dadka Soomaaliyeed geyeysiin doono in sumaddooda iyo sawracooda Soomaalinnimo uu lumo. Arrinku siduu doono ha noqdee, qoraalkani maaha mid ku saabsan wax ka sheegga isirka dadka Soomaaliyeed. Hayeeshee, wuxu ku ekaan ka warcelinta weydiimaha kala ah: Af Soomaaliga iyo af Carabigu ma isku bah baa? Af Soomaaligu ma af Carabiguu ka soo jeedaa? Haddii ay warcelintu maya tahay, maxay labada af ku kala duwan yihiin? Af Carabigu saamayn intee leeg buu ku leeyahay af Soomaaliga? Iyo ugu dambayntii af Carabigu ma af Soomaaliga oo qudha ayuu saamaynta intaa leeg ku leeyahay?

Si weydiintaa loogu helo warcelin buuxda, waxa lagama maarmaan ah in la adeegsado aqoonta afafka, taasi oo aan kaga hadlidoonno qoys afeedyada ay labada af ka kala tirsan yihiin, waxay ku kala duwan yihiin iyo waxa ay iskaga midka yihiin haddii ay jirtaba. Kolka aan intaa eegno waxan si hawl yar u ogaan karnaa inuu af Soomaali-gu yahay af

Carbeed isbeddelay iyo inuu yahay af iskii uga madaxbannaan af Carabiga.

## II. Qoys afeedyada:

Aqoonta afafku sida ay sheegayso afafka adduunka lagaga hadlo waxa loo qaybiyaa qoysas sida *Afro-asiatic languages* (Afafka Afrika iyo Eeshiya lagaga hadlo), *Indo-European languages*, iwm. Waxana jira afaf isku qoysa oo haddana kala bah ah iyo qaar walaalo ah. Siday doontaba ha ahaatee, af Soomaaliyaga iyo af Carabiguba waxay kawada tirsanyihiin qoys afeedka loo yaqaan *Afro-asiatic languages*. Hase ahaatee, mid kastaa bah gaara buu ka sii tirsan yahay. Tusaale ahaan, af Soomaaligu wuxu ku jiraa bah afeedda loo yaqaan *Cushitic languages*. Halka uu af Carabigu ka tirsan yahay bah afeedda loo yaqaan *Semitic languages*.

### A. Afafka Semetigga (Semitic languages):

Afafka Semetigga waxa loo kala saara 3 kooxood oo kala ah:

1. Afafka Semetigga Bari
2. Afafka Semetigga Waqooyi-galbeed ama Galbeed, iyo
3. Afafka Semetigga Koonfur-galbeed. ama Koonfureed.

### B. Afafka Kushitigga (Cushitic languages):

Afafka Kushitigga waxa lagaga hadlaa geeska Afrika, waxana loo kala saaraa:

- Afka Beejada
- Afafka kushitigga dhexe
- Afafka kushitigga bari, iyo
- Afafka Kushitigga koonfureed

Af Soomaaligu wuxu ka sii tirsan yahay afafka Kushitigga Bari. Waxa kale oo afafkaasi ka mid ah afka Oroomada, ka Canfarta, ka Sii-daamada, iyo ka Saahada. Halkaana waxa inooga caddaatay inaanu af Soomaaligu ka iman ama ka soo jeedin af Carabiga sida dhowaanahan dambe lagu doodo. Si aan aragtidaasi u sii adkayno waxan eegi doonnaa wax yaabaha kale ee lagu ogaado kala duwanaanshaha afafka. Waxana ka mid ah: dhawaaqa, qaab dhismeedka iyo eray saleedyada.

## III. Kala duwanaashaha afafka:

Si aan u ogaanno ama u sii caddayno kala duwanaashaha af Soomaaliga iyo af Carabiga

waxa qumman inaan isu foodinno dhawaaqa, qaab dhismeedka iyo eray saleedyada labada af, taasi oo innagu dhiirrin doonta inaan si fudud uga warcelinno weydiintennii ahayd af Soomaaligu ma af Carbeed beddelan baa mise isagaabu ka soo jeedaa?

A. Dhawaaqa afka:

Kolka laga yimaaddo inay laba af isku qoys afeed yihiin ama aanay ahayn, waxa u horreeya ee lagu kala garan karo kala duwanaanshahahoodu waa dhawaaqa. Sidaasi awgeed ayaa laba af iyo in ka badanba dhawaaqa loogu kala duwikaraa lana sheegi karaa inay kala duwan yihiin.

B. Qaab dhismeedka afka:

Dhawaaqa ka sokow, waxa la ogaaday inay afafku ku kala duwan yihiin dhanka qaab dhismeedka. Tusaale ahaan bal u fiirso tusaalooyinkan hoos ku qoran:

**1. Ali ate a piece of cake**

S V O;

\*Af Ingiriiska waxa horreeya 'falaha', waxa ku xiga 'falka' waxana u dambeeya 'la falaha'.

**2. Cali baa qarooc keeg ah cunay**

S O V;

\*Af Soomaaliga waxa u horreeya 'falaha', waxa ku xiga 'la falaha' waxana u dambeeya 'falka'.

**3 اكل علي قطعة من الكعك**

O S V (dhanka midig ka soo bilow)

\*Af Carbeedka isaga waxa u hormara 'falka', waxa ku xiga 'falaha', waxana u dambeeya 'la falaha'.

Waxa halkaa inooga dhuroobey in saddexda afba kala duwan yihiin, oo aan midna mid la mid ahayn.

C. Eray saleedyada:

Qodobka saddexaad ee lagu ogaan karo kala duwanaashaha af Soomaaliga iyo af Carabigu waa iyada oo laysu foodiyo eray saleedyada labada af. Waxanu qoraalkani isu foodin

doonnaa shanta af ee kala ah af Ingiriiska, af Soomaaliga, af Carabiga, afka Oroomada iyo af Ruushka.

Af Ingiriisi	Af Soomaali	Af Carabi	Afaan Oromo	Af Ruush
I	Aniga	انا	Ani, ana	Я
You	Adiga	انت	Ati *	Ты
We	Annaga	نحن	Nuti *	Мы
All	Dhammaan	جميعا	därä	всякий
Many	Badan	كثير	Bayyina	Много
One	Kow	واحد	tokko	Один
Two	Laba	اثنين	Lama *	Два
Three	Saddex	ثلاثة	Sadii *	Три
Four	Afar	اربعة	Afur *	Четыре
Five	Shan	خمسة	Shan *	Пять
Big	Weyn	كبير	Guddaa	большой
Long	Dheer	طويل	Dheera *	Длинный
Small	Yar	صغير	Diqqa	Маленький
Woman	Naag	امراة	Niti *	Женщина
Man	Nin	رجل	Nama *	Мужчина
Person	Qof	شخص	Nama *	Человек
Fish	Kalluun	سمك	Qurxummii	Рыба
Bird	Shimbir	طائر	shimbira*	птица
Dog	Ey	كلب	yeeyii *	собака
Louse	Injir	قمل	Injiree *	вошь
Tree	Geed	شجرة	Muka	Дерево
Leaf	Caleen	ورقة	Baala	лист
Root	Xidid	جذر	Hidda, hundee	корень
Bark	Jidhif	لحاء	Dutu	кора

Skin	Maqaar	البشرة	Gogaa	Кожа
------	--------	--------	-------	------

Meat	Hilib	لحم	Foon	Мясо
Blood	Dhiig	دم	Dhiga *	Кровь
Bone	Laf	عظم	Lafee *	Кость
Fat (n.)	Baruur	شحم	Furddaa	толстый
Egg	Ugxaan	بيض	Hanqaaquu	Яйцо
Horn	Gees	قرن	Gaafa	рог
Tail	Dabo	ذيل	Duboo *	Хвост
Feather	Baal	ريش	Baalli	перо
Hair	Tin (timo)	شعر	Rifeensa	Волос
Head	Madax	راس	Mataa *	Голова
Ear	Dheg	اذن	Dhageeytii, gurra	Ухо
Eye	Il	عين	Ila, ija *	Глаз
Nose	San	انف	Funyaan*	Нос
Mouth	Af	فم	Afaan	Рот
Tooth	Ilig	سن	Ilka *	Зуб
Tongue	Carrab	لسان	Arrab *	Язык
Nail	Ciddi	ظفر	Qeensa	ноготь
Leg	Lug	رجل	Luka *	Нога
Knee	Jilib (law)	ركبه	Jilba *	Колено
Arm	Cudud	ذراع	Gana	рука
Belly	Calool	بطن	Gara	Живот
Breast	Naas	ثدي	Harma	Грудь
Neck	Luqun, qoor	عنق	Lukuma, Morma	Шея

Heart	Wadne	قلب	Onnee	Сердце
Liver	Beer	كبد	Tiru	Печень
Name	Magac	اسم	Maqa	Ймя
Sun	Qorrax	شمس	Aduu	Солнце
Moon	Dayax	قمر	Baatii	Луна
Star	Xiddig	نجم	Urjii	Звезда
Water	Biyo	ماء	Koddaa	Вода
Rain	Roob	مطر	Rooba *	Дождь
Cloud	Daruur	سحاب	Golgola, duumeessa	Облако
Earth	Dhul	ارض	Ardii, lafa	Родина
Sand	Ciid	تراب	Cirracha	Песок
Stone	Dhagax	حجر	Dhagaa *	Камень
Mountain	Buur	جبل	Tulluu	Гора
Path/road	Jid/waddo	طريق	Karaa	Улица
Fire	Dab	نار	Ibidda	Огонь
Ash	Dambas	رماد	Daaraa	Зола
Smoke	Qiiq	دخان	aara	Дым
Night	Habeen	ليل	Halkan	Ночь
Drink	Dhan	اشرب	Obaasa, dhugi	Пить
Eat	Cun	كل	Nyaadhu	Есть
Bite	Qaniin	عض	Ciniinu	Кусать
See	Arag	نظرة	Arguu, arkuu *	Смотри

Hear	Maqal	سماع	Dhagayuu	Слышать
Know	Ogow/garo	اعلم	Beekuu	Знать
Sleep	Seexo	نم	Rafuu	Спать
Lie (down)	Jiifso	إضطجع	Ciisu * C = J	Лежать
Sit	Fadhiiso	اجلس	Taa'uu	Сидеть

Stand	Istaag	قم	Ka'uu	Вставать
Go	Bax, tag	اذهب	Bah *	Ходить
Come	Kaalay	تعال	koottu	Идти
Fly	Duul	طار	Bararuu	Летать
Give	Sii	اعط	kennuu	Давать
Say	Dheh	قل	Jedhuu	сказать
Die	Dhimo	مت	Du'uu	Умирать
Kill	Dil	اقتل	Ajjeesuu	Убивать
Full	Buux	ملي	Guutuu	полный
To burn	Gub	احرق	Gub	Обжигать
Hot	Kulayl	حرارة	Owwaa	горячий
Black	Madow	اسود	Gurraac c = j	Чёрный
White	Cad	ابيض	Adii *	белый
Red	Cas, dhiin	احمر	Diimaa *	Красный
Yellow	Huruud	اصفر	Urud *	желтый
Green	Doogo/cagaar	اخضر	Magarisa	Зеленый



Ripe	Bisil/bisayl	ناضج	Bilchina	спелый
Unripe	Ceedhin	غير ناضج	Xobbee, jiraa	распарывать
Rotten	Qudhmay	فاسد	Tortoraa	гнилой
Dry	Engeg/qalayl	جاف	Goggogaa	Невареный
Cold	Qabaw	برد	Qabbana	Холодный
New	Cusub	جديد	Haarawa	Новый
Good	Fiican/wanaagsan	حسن	Bayeessa	Хороший
Far	Fog	بعيد	Fagoo	дальний
Near	Dhow	قريب	Dhi'oo	близкий

Erayada shaxanka ku jiraa sidaan soo sheegnay waa kuwa loo yaqaan ma guuraanka. Afna af erayadaasi kama ergisto. Haddaba waxa sha-xanka inooga dhuroobay in af Ingiriiska, af Carabiga, af Soomaaliga iyo af Ruushka aanu midna mid la mid ahayn oo ay yihiin afar af oo kala madax bannaan. Hayeeshee, haddii aad isu foodiso af Soomaaliga iyo af Oroomada waxad dareemaysaa in xidhiidh weyni ka dhexeeyo. Bal u firso erayada xiddigta leh ee afka Oroomada una foodi kuwa dhiggooda ah ee Soomaaliga ah. Tusaale ahaan erayada:

Madax	> <	Mataa	Bax	> <	Bah
Dhagax	> <	Dhagaa	Saddex	>	<
Sadii					
Carrab	> <	Arrab	Magac	> <	Maga
Cad	> <	Adii			

Halkaa waxa inooga dhuroobey inaanay Oroomadu lahayn labada xaraf ee 'X'-a iyo 'C'-a. Kuwan hoosana uu dhawaaqa uun isbeddel yari ku dhacay, sida kalese ay isugu mid yihiin.

Afar	><	Afur	Shan	><	Shan
Arag	><	Argaa, arkuu	Ey	><	yeeyii
Il	><	Ila, ija	Ilig	><	Ilka
Injir	><	Injiree	Laba	><	Lama
Shimbir	><	shimbira			

Shanta af laba isaga dhowi ma jiraan Soomaaliga iyo Oroomada. Taasina waxay caddaynaysaa inay meel ka soo wada jeedaan. Sidaasi awgeed ayey af yaqaannadu u sheegaan in af Soomaaliga iyo afka Oroomadu ay walaalo yihiin. Waxa haddaba isweydiin mudan xagga ay ka yimaaddeen erayada badan ee af Carabiga ah ee ay dadka Soomaaliyeed ku hadlaan?

Si aan weydiintaa qudheeda uga warcelinno waxa habboon inaan wax ka nidhaa erayada loo yaqaan ‘eray dhaqameedyada’.

### C. Eray dhaqameedyada:

Eray dhaqameedyadu waa kuwa lagu kala duwan yahay qaybta weyna ka qaata hodannimada afka. Waxaanay ku xidhanyihiin il-baxnimada dadka afkaas ku hadla. Sida ay dadku ama bulshooyinku xidhiidh u yeeshaan ama u dersaanna way isu saameeyaan. Muranna, runtii, kama jiro inuu af Carabigu saamayn weyn ku leeyahay af Soomaaliga. Waxana keenay xidhiidhka ganacsi iyo diinta Islaamka.

Waxase jira erayo badan oo Carabiya oo aan loo baahnayn adeegsigooda, hayeeshee, ay dadku si indha la’aan ah u adeegsadaan. Tusaale ahaan, erayga ‘qado’ waa Carabi in la adeegsadaana looma baahna. Adeegsiga eraygaasi cay buu ku yahay dadka Soomaaliyeed. Waayo wuxu tilmaamayaa inaanay Soomaalidu waxba cunijirin xidhiidhkii Carabka ka hor. Erayga Soomaaliga ah ee u dhigma qado waa hadhimo. Kuwa kale ee aan loo baahnayn ama laga maarmi karo haddii aan wax ka soo qaadanno waxa ka mid ah:

Albaab	=	Afsaar, irrid, marin,	milay.		
		kadin, afaaf		Subax	= Aroor
Casho	=	Xiraad		Duhur	= Hadhgal
Waqti	=	Xilli, goor, ammin,		Maqrib	= Fiid

Suxuur	=	Hiraab	Calaamad	=	Astaan
Weji	=	Fool	Bikrad	=	Bocor
Salaan v.	=	Bariidi	Bisad	=	Dinnad, basho,
Luqad	=	Af		=	yaanyuur,
Caqli	=	Garaad,xirgi, miyir		=	makulaal
Daar	=	Aqal, sar	Cawar	=	Illaw
Caasimad	=		Ceeb	=	Bayuur
		Magaalamadax	Su'aal	=	Waydiin
Tahniyad	=	Hambalyo	Jawaab	=	Warcelin
Tacsi	=	Baroordiiq	Macluumaad	=	Wacaal
Sannad	=	Gu'	Malqacad	=	Qaaddo, fandhaal
Makhsin	=	Qol	Dembi	=	Dhagar
Sariir	=	Rarrab	Sharci	=	Xeer,
Macallin	=	Bare	Khaas ah	=	Gaar ah
Madderesiad	=	Dugsi	Marawaxad	=	Babbiso
Milix	=	Cusbo	Nasiib	=	Ayaan, cawo, doobir
Qaamuus	=	Abwaan	Qani	=	Hodan
Kelmed	=	Eray, hal	Dawlad	=	Talis
Isticmaal	=	Adeegso	Fursad	=	Kanshe
Qalbi	=	Wadne			
Niyad	=	Nabdi			
Deris	=	Cashar			
Caalim	=	Buuni			
Madar	=	Shir ama madal.			iyoo qaar kaloo badan
Duco	=	Durraansi			

Waxa kale oo xusid mudan inaanu af Soomaaligu ahayn afka keliya ee uu af Carabigu saamaynta intaa leeg ku leeyahay. Afafka kale ee uu saamayeyna waxa ka mid ah :

Berberka, Kurdishka, Beershiyanka, Bashtuuga, Urduuga, Bunjaabiga, Siikha, Turkishka, Isbaanishka, Hindiga, Boortagiiska, Katalanka, Sawaaxiliga, Malayga, Induuniisiyanka, Faransiiska iyo Ingiriiska.

Haddii aan wax ka tilmaamo erayada af Carabiga ah ee ku jira af Ingiriiska waxan soo qaadan karnaa:

**admiral** : أمير *amīr*, commander. *Amīr al-bihār* = "commander of the seas" was a title in use in Arabic Sicily,

**alchemy, chemistry** : الكيمياء *al-kīmiyā*, alchemy. The Arabic entered medieval Latin as *alchimia*,

**alcohol** : الكحل *al-kohl*, finely powdered kohl, spirit."

**alfalfa** : الفصفاة *al-fisfisa*, alfalfa.

**algebra** : الجبر *al-jabr*, completing, or restoring broken parts. The mathematical sense originates from the title of the book "*al-kitāb al-mukhtaṣar fī ḥisāb al-jabr wa al-muqābala*",

**algorithm, algorism** : الخوارزمي *al-khwārizmī*, a short name for the mathematician Muhammad ibn Mūsā al-Khwārizmī.

**cipher, decipher** : صفر *sifr*, zero. Cipher came to Europe with Arabic numerals.

**coffee, café** : قهوة *qahwa*, coffee. *Qahwa* (itself of uncertain origin) begot Turkish *kahveh* which begot Italian *caffè*.

**fustic (yellow dye)** : ستق *fustuq*, pistachio.

**coffee, café** : قهوة *qahwa*, coffee. *Qahwa* (itself of uncertain origin) begot Turkish *kahveh* which begot Italian *caffè*. The latter form entered most Western languages in and around the early 17th century. The early 17th century West also has numerous records in which the word-form was directly from the Arabic, e.g. Cahoa in 1610, Cahue in 1615, Cowha in 1619. Turkish phonology does not have a 'W'. The change from 'W' to 'V' in going from Arabic *qahwa* to Turkish *kahveh* can be seen in many other loanwords going from Arabic into Turkish (such as Arabic *fatwa* --> Turkish *fetva*).

**cotton** : قطن *qutun*, cotton. This word entered the Romance languages in the mid-12th century and English a century later.

**fustic** (yellow dye) : فستق *Fustuq*, pistachio. In medieval Spain a dye from the wood of a certain tree was in use.

**giraffe** : زرافة *zarāfa*, giraffe. Arabic entered Italian and French in the late 13th century.

**guitar** : قيتارة *qītāra*, a kind of guitar. "The name reached English several times, including 14th century *giterne* from Old French. The modern word is directly from Spanish *guitarra*, from Arabic *qitar*."

**harem** : حريم *harīm*, women's quarters in a large household.

**hashish** : حشيش *hashīsh*, hashish. Hashish has the literal meaning "dried herb" and "grass" in Arabic.

**henna, alkanet, alkannin, Alkanna** : الحناء *al-hinnā*, henna.

**spinach** : إسبناخ *isbinākh* in Andalusian Arabic, and إسفاناخ *isfānākh* in eastern classical Arabic, from Persian *aspanākh*, spinach.

**sugar** : سكر *sukkar*, sugar. The word is ultimately from Sanskrit *sharkara* = "sugar", iyo qaar kaloo badan.

Dhanka afka Isbaanishka isaga lagaba gayoon maayo saamaynta uu af Carabigu ku leeyahay. Sida ay taariikhyahannadu sheegaanna siddeed qarni ku dhuwaad ayuu Islaamku ka talinayey dalka hadda Isbeyn loo yaqaan. Sidaasi awgeed iska daa erayada af Carabiga ah ee afka ku biiray ee magacyada jiidaha, webiyada, dooxooyinka iyo buuruhuba waxay leeyihiin magacyo af Carabi ka soo jeeda. Tusaale ahaan, meelo badan oo dhulka loo yaqaan 'Land of Valencia' ayey magacyadoodu yihiin Carabi sida *Alicante/Alacant, Alzira, Almassora*, iwm. Magacyada meelo badan baa ku bilaabma erayada *Beni, Bena* and *Bene*, oo dhammaantood la ujeedo ah 'Ina' tusaale ahaan: *Benidorm, Benimuslem, Benilloba, Benillup, Benimantell, Benimarfull, Benicàssim, Benissa, Benissoda, Benirredrà, Benaguasil, Benasau, Beneixama, Benaixeve, Beneixida, Benetússer, Beniflà, Beniardà, Beniarrés, Beniatjar, Benicarló, Benicolet, Benicull de Xúquer, Benidoleig, Benifaió, Benifairó de la Vall d'igna, Benifairó de les Valls, Benifato, Benigànim, Benigembla, Benimodo, Benimassot, Benimeli, Beniparrell, Benavites, Benafigos, Benitatxell, iwm.*

Afka Urduuga isagana saamayn weyn buu af Carabigu ku leeyahay. Si kastaba ha ahaatee, af Carabigu maaha afka qudha ee afafkaasi saamayeyey. Tusaale ahaan, af Faransiisku

saamayn weyn buu ku leeyahay af Ingiriiska. Sida ay af yaqaannadu sheegaanna erayada Ingiriiska boqolkiiba lixdan baa ka soo jeeda af Faransiiska. Sida ku cad qoraalkan hoos ku xusan

Cid ku dooda inuu af Ingiriisku af Faransiis beddelmayna ma jirto. Afafka adduunka oo dhammina sidaasi ayey isu saameeyaan. Waxa haddaba wax aad loola yaabo ah in la helo dad Soomaaliyeed oo ku doodaya inuu af Soomaaligu yahay af Carabi, ama kolkii ay dareemeen erayo badan oo ay dadku adeegsanayaan ay u qaateen inuu afku ka soo jeedo af Carabi.

#### IV.Gebagebo:

Guntii iyo gebagebadii, waxaan isku deyey inaan qoraalkan kooban kaga warceliyo weydiimaha kala ah: Af Soomaaligu ma af Carabiguu la bah yahay, ama ka soo jeedaa? Haddii ay warcelintu maya tahay, maxay ku kala duwan yihiin? Waxanan runtii caddeeyey in aanu af Soomaaligu ka soo jeedin af Carabiga. Hayeeshee, in xidhiidhkii ganacsi iyo imaatinkii diinta Islaamka awgood uu af Carabigu saamayn weyn afkeenna ku yeeshay. Taasina aanay af Soomaaliga oo qudha ku gaar ahayne uu af Carbeedku afaf badan oo adduunka ah uu saamayn teenna leeg ama ka weyn ku yeeshay. Sidaasi darteedna aan la odhan karin af Soomaaligu waa af Carabi is beddelay ama wuuba ka soo jeedaa.

Cabdiraxmaan Guri Barwaaqo  
Email: [Herer\\_09@yahoo.com](mailto:Herer_09@yahoo.com)

#### ----- Raadraac:

- 1.Campbell, Lyle. *Historical Linguistics: An introduction*, The MIT press/Cambridge, Massachusetts, 1999, xx,396pp.
2. Maxamed Nuux Cali. *History in the Horn of Africa, 1000 B.C.—1500 A.D.: Aspects of Social and economical change between the rift Valley and the Indian Ocean*, PhD. Dissertation, University of California, Los Angeles, 1985.
3. Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal(edited by B.W. Andrzejewski). *Xikmad Soomaali*. Oxford

University Press, London, 1956, xi,150pp.

4. Saeed, John Ibraahim. *Somali Reference Grammar*. Dun woody Press/Wheaton, MD,1987. vi, 275pp
5. Shire Jaamac Axmed. *Naxwaha Af Soomaaliga, Akadeemiyaha Dhaqanka wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta sare, Xamar, 1976*
6. Siciid Cismaan Guuleed (سعيد عثمان جوليد). *الفاظ عربية في اللغة الصومالية*, Cadan, 1973
7. Fromkin, Victoria // Rodman, Robert // Hultin, Neil // logan, Harry: *An introduction to language*, Toronto, Harcourt Canada Ltd. , 2001.
8. [en.wikipedia.org/wiki/List\\_of\\_Arabic\\_loanwords\\_in\\_English](http://en.wikipedia.org/wiki/List_of_Arabic_loanwords_in_English)
9. Oromo-English online dictionary
10. English: A French Language by Alexander Kimenyi
11. [Influence of Arabic on other languages](http://en.wikipedia.org/wiki/Influence_of_Arabic_on_other_languages): en.wikipedia.org/wiki/Influence\_of\_Arabic\_on\_other\_languages